

Soo dhawaw 2021-2022

Mudane/Marwo Waalid ama Mas'uul –

Sanadkan ardaygaagu waxa uu ka qayb qaadan doonaa mashruuc lagu magacaabo National History Day. Ardaydu waxay baran doonaan xirfado kuwaas oo ka caawin doonta machadka iyo nolosha ka dambaysa dugsiga sare.

Sanadkan mawduuca wayn laga hadlayo ee History Day waa : "**Dood iyo Diblomaasiyadda Taariikhda: Guulo, Guuldarrooyin, Natijoooyin.**" Ardaygaagu waxa uu dooran doonaa mawduuc xidhiidh la leh mawduucan wayn ee laga hadlayo. Mawduucani waxa uu noqon doonaa mid taariikhi ah, oo aan ahayn dhacdo hadda ah. Ardaydu waxay cilmi baadhista mawduucoda ka samayn doonaan bugaagta, boggaga internet-ka, ama maktabadaha.

History Day ardaydu waxay wadaagaan shaqadooda ayaga oo abuuraya mashruucyo. Waxay shan qaab oo kala duwan ka dooran doonaan mid kaliyaata:

- So bandhigga matxafka qaababkiisa
- Dukumentary
- Bogga internet-ka
- Waxqabadka
- Waraaq

Sannadka oo dhan, ardaygaagu waxa uu wakhti badan ku qaadan doonaa mashruucan. Waxa laga yaabaa in uu ardaygaagu u abuurto mashruucan si uu uga helo darajo fasalka. Macalinka ardaygaagu wuxuu dooran doonaa taariikhaha la iska rabo in lasoo gudbiyo, hawlaha, iyo shaqooyinka loogu talo galay mashruuca.

Ardaydu waxay heli doonaan ikhtiyaarka ah in ay galiyaan mashruucoda tartan. Waxaa jira heerar kala duwan tartanka. Marka la taagan yahay heer kasta, waxa la dooran doonaa mashruucyo si loogu horumariyo heer ka xiga. Garsoorayaashu waxay ardayda la yeelan doonaan waraysi ku saabsan cilmi baadhista iyo mashruuca.

Waalidiinta iyo qoysaska waa la soo dhaweenayaa inay kasoo qayb galaan!

- **Dugsiga** – Macalimiintu waxay doortaan taariikhaha dhacda dugsiga.
- **Goboleed** – 12 dhacdooyin Goboleed ayaa dhaca gudaha bisha Maarso. Kala hadal macalinkaaga taariikhda.
- **Dawladd-goboleedka** – Maayo 1, 2022
- **Qaranka** – Yuunyo 2022

Sidee ayaad u caawin kartaa?

- **Kala fikir** ardaydaada mawduucyo
- **Ka caawi** inay tagaan maktabadaha
- **Xasuusi** iyaga taariikhda ay kaga eegtahay soo gudbintu
- **Kala hadal** waxyaabaha ay soo barten

Anagu yaanu nahay?

History Day waa barnaamij qaraneed. Marka la joogo Minnesota, iskaashi u dhexeeya Minnesota Historical Society iyo Jaamacadda Minnesota.

Shaqaalaha Minnesota Historical Society waxay caawimo ka gaystaan taageerada macalimiinta iyo ardayda ayaga oo u maraya qalabada manhajka, aqoon iswaydaarsiyo, dhacdooyin maktabadeed, iyo tartanno.

Waad ku mahadsantahay taageerada aad taageerayso ardaygaaga marka ay curinayaan mashruuc History Day ah! Waxaad History Day wax badan ka baran kartaa boggayaga internet-ka, www.mnhs.org/historyday.

Sammi Jo Papas

Sammi Jo Papas
Maamulaha Barnaamijka iyo Isuduwaha dawlad goboleedka
National History Day in Minnesota
samantha.papas@mnhs.org